IDG Group DMCC

1405 JBC 5, Cluster W, Jumeriah Lakes Towers, PO Box 50784, Dubai, UAE

# Siyaasadda Faaladda Iyo Cabashooyinka

DECEMBER 2020

NOOCA 2

**VERSION CONTROL**

| QAYBTA | SOO SAARAY | QORAA | LOO OGOLAADAY IN LA SII DAAYO |
|---|---|---|---|
| 1 | SEP 15 | G WINTER | I GORDON |
| 2 | DEC 20 | G WINTER |  |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

# SHAXDA TUSMADA

Shaxda tusmada

## Contents


VERSION CONTROL ........................................................ 3

1. Ujeedo ........................................................ 3

2. Baaxadda ........................................................ 3

3. Meelaha Gaarka Ah Ee Xiisaha Leh ........................................................ 3

4. Qarsoodi ........................................................ 4

5. Mas'uuliyadda fulinta ........................................................ 4

6. Sideen faallo ama cabasho u sameeyaa? ........................................................ 4

6.1. Beddelka ........................................................ 4

7. Baaritaanka Cabashada iyo Tallaabooyinka xiga ........................................................ 5

8. Wax ka qabashada Faallooyinka ........................................................ 5

9. Kormeerka iyo dib u eegista siyaasadda ........................................................ 6

# Siyaasadda Faaladda Iyo Cabashooyinka

## 1. Ujeedo

IDG waxaa ka go'an heerarka ugu sarreeya ee waxqabadka iyo dhaqanka. Marka sidaas la sameeyo, waxaan aqoonsannahay in macaamiisheena, daneeyayaasha iyo kuwa aan la falgalno ay rabaan inay wax ka sheegaan, ama laga yaabo inay ka cawdaan waxqabadkeena.

Waxaynuna soo dhaweyneynaa dhammaan jawaab celinta, kuwa togan iyo kuwa taban labadaba, waxaaynu raadineynaa inaan u isticmaalno macluumaadkan hagaajinta si joogto ah, iyo si aan u ogolaano inaan si degdeg ah u saxno khaladaadkeena ama hagaajino heerarkeena wanaagsan.

## 2. Baaxadda.

Siyaasadda soo socotaa waxay dejinaysaa habka ay shakhsiyaadku ama Ururadu uga warbixin karaan walaacyada ku saabsan kuwan hoose:

- Khatarta suurtagalka ah, dhaqamada goobta shaqada ee sharci darrada ah ama anshax-darrada ah
- heerarka liitaa ee waxqabadka ama dhaqanka
- soo jeedinta iyo hagaajinta.

Intaa waxaa dheer, Siyaasaddani waxaa sidoo kale loogu talagalay inay inaga caawiso aqoonsiga halka aan si fiican uga shaqeyneyno, iyo inaan aqoonsanno ficillada urrureed ama kuwa gaarka ah ee u qalma aqoonsiga:

- Tusaalooyinka dhaqamada goobta shaqada ee sida gaar ah waxtar u leh, faa'iidooyina leh, oo wax ku ool ah ama haddii kale la soo dhaweynayo
- Ficilada shaqsiyaadka kuwaas oo u socda kor iyo hoos una qalma in la aqoonsado
- Guud ahaan indho indhaynta iyo faalooyinka noo suuragalay inaan horamarino

## 3. Meelaha Gaarka Ah Ee Xiisaha Leh

IDG waxa ka go'an qaybo gaar ah oo Mabaadi'da hagaya ganacsigeena, xirfada iyo habdhaqanka shakhsi ahaaneed. Waxaan si gaar ah u xiisaynaynaa welwel kasta oo ay khusayso kuwan:

- **Xeerka Anshaxa Caalamiga ah.**

  http://icoca.ch/sites/default/files/resources/ICoC_English.pdf

- **Is afgaradka Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay**

  **https://www.unglobalcompact.org/**

### 4. Qarsoodi

IDG waxay soo dhawaynaysaa dhamaan ra'yi celinta laakiin way ka warqabtaa in qaar badani door bidayaan inay soo gudbiyaan indha indhayntooda si qarsoodi ah. Nidaamkeena waxaa loo qaabeeyey inuu tan ka tarjumayo oo asal ahaan qarsoodi ah, waxaanan siinaa ka qaybqaatayaasha awoodda ay ku 'dooran karaan' ee ku saabsan faahfaahintooda shaqsiyeed

## 5. Mas'uuliyadda fulinta

Guddiga Agaasimayaasha ayaa leh mas'uuliyadda guud ee hirgelinta siyaasaddan, laakiin waxay u wakiishaan mas'uuliyadda maalinlaha ah, ee kormeerka iyo dhaqangelinta Sarkaalka Sare ee Fulinta (CEO).

Mas'uuliyadda la socodka iyo dib u eegista hab socodka siyaasaddan iyo wixii talo ah, ee isbeddelka Ururka dhexdiisa ka dhasha baaritaannada iyo cabashooyinka hoos yimaada siyaasadda waxa u xilsaaran guddiga.

Anigoo ka wakiil ah, guddiga, ahna Sarkaalka Magacaaban ee IDG oo ah maareeyaha ugu sareeya ee parent company ee IDG Group DMCC, Mr Nick Alister-Jones.

### 6. Sideen faallo ama cabasho u sameeyaa?

Website/mareegta IDG waxay kuu ogolaanaysaa 'Faallo ka samee/bixi' boggeeda 'Nala Soo Xiriir' Markaad doorato midkaad dooranayso, waxaa lagu siin doonaa foom gaaban oo online ah, si aad u buuxiso.

Nuxurka foomku waa qayb lagu qori karo faalladaada ama cabashadaada. Dhammaadka foomka waxaa jira ikhtiyaar/kala doorasho aad ku bixin karto faahfaahinta xiriirkaaga haddii aad rabto inaad sidaas sameyso laakiin soo gudbinta macluumaadkan waa ikhtiyaari. Haddii aad rabto inaad bixiso faahfaahintaada, waxaad sidoo kale dooran kartaa ikhtiyaarkaaga ee aad nooga baahan inaan si toos ah uga jawaabno faallooyinkaaga ama cabashadaada iyadoo la adeegsanayo faahfaahinta xiriirka ee la bixiyay.

Marka faallo ama cabasho lagu helo si qarsoodi ah tallaabooyinka ay qaaday IDG ee taas looga jawaabayo laguuma soo bandhigi doono adiga, lagumana daabici doono si loo daawado.

#### 6.1 Beddelka

Haddii website/mareegtu uu yahay mid aan la heli karin sabab kasta, ama uusan ahayn habka aad door bidayso inaad ku gudbiso faallo ama cabasho, waxaan soo dhawaynaynaa Emailada ciwaankan hoose ayaad ku soo diri kartaan.

**comments@idg-security.com**

Ciwaanka Emailkan waxa la soconaya IDG's Sarkaalka loo magacaabay. Waxaan soo jeedin lahayn in macluumaadka soo socda la bixiyo, laakiin tani gabi ahaanba waa go'aankaaga.

- Taariikhda
- Wakhtiga
- Goobta
- Sharaxaada dhacdada mudan in cabashada / faalo laga bixiyo
- Xiriirkaaga oo faahfaahsan
- Samee odhaahda, aadan rabin inaad ka hesho jawaab-celin

Fadlan sheeg in aad isticmaalayso siyaasadda faallooyinka iyo cabashada oo cadee haddii aad rabto in aqoonsigaaga lagu xafido.

## 7. Baaritaanka Cabashada iyo Tallaabooyinka xiga

IDG waxaa ka go'an in ay si buuxda, cadaalad, deg deg ah oo qarsoodi ah u baarto cabashooyinka halka ay duruuftu ogolaato. Ka dib helidda cabashada DO (ama qof kale oo meeshooda ka shaqeeya) waxay samayn doonaan qabanqaabada ku habboon baaritaanka.

Dhererka iyo baaxadda baaritaanka DO waxay ku xirnaan doontaa mawduuca muujinya. Inta badan, DO waxay samayn doontaa qiimaynta hore ee muujinaysa si loo go'aamiyo inay jiraan sababo baadhitaan faahfaahsan oo la qabanayo, ama haddii muujinayso in si dhakhso ah loo sixi karo jihada maamul ee degdega ah.

Haddii baaritaan dheer loo baahdo, DO waxay sameyn doontaa baaritaan gudaha ah, waxayna dooran kartaa in lagu daro shaqaale takhasus u leh, oo khibrad u leh, nidaamka goobta shaqada ama aqoonta takhasuska leh, ee mawduuca la baarayo.

Baaritaanku waxay ujeedadiisu noqon dootaa in la go'aamiyo tafaasiisha cabashada, wuxuuna soo jeedin doonaa talooyinka ficilka xiga. Talooyinkan waxaa ku jiri kara labadaba ficilada anshax-marinta, isbeddelka siyaasadda iyo nidaamka, ama suurtogalka ah in loo sheego mas'uuliyiinta ama hay'adaha ay khuseyso haddii loo baahdo. Talooyinka waxaa loo gudbin doonaa maamulaha guud si loo ansixiyo. Maamulaha guud (oo ay taageerayaan guddiga, haddii loo baahdo) ayaa markaa mas'uul ka noqon doona kormeerka fulinta tallaabooyinka ay oggolaadeen.

Haddii aad doorатay inaad ra'yi celin ka raadiso faallooyinkaaga ama cabashadaada, DO waxay ku soo qori doontaa, emailka, si ay kaagala taliso natiijada baaritaanka iyo ficillada la qaaday.

## 8. Wax ka qabashada Faallooyinka

IDG ma filayo 'faallooyinka' u baahan baaritaan inkastoo DO laga yaabo, go'aankiisa, inuu doorto inuu baaro.

Meesha shaqsi lagu soocay amaan, IDG waxaa ka go'an in ay hubiso aqoonsiga qofkaas. Diiwaanka faallooyinka togan ayaa lagu hayn doonaa faylalkooda gaarka ah ee nidaamka HRIS,

iyo IDG waxa kale oo laga yaabaa inay doortaan inay sameeyaan abaalmarin maaliyadeed (nooc gunno ikhtiyaari ah). Marka siyaasad, habraac ama faallo urur la aqoonsaday, IDG waxay raadin doontaa inay hubiso in tan loo aasaasay sidii ku dhaqanka ugu wanaagsan iyada oo loo marayo isbeddello lagu sameeyo Siyaasadda, nidaamyada hawlgalka, barnaamijyada tababarka, jihaynta maamulka, iyo tafaasiisha kale meelaha hawlgalka sida amarada Boostada Ilaalada, iwm.

## 9. Kormeerka iyo dib u eegista siyaasadda

DO, oo ay weheliso maamulaha guud, ayaa mas'uul ka noqon doona dib u eegista siyaasaddan marka loo eego dhinaca sharci-dejinta iyo hawlgelinta ugu yaraan sannadkiiba mar.